

# Su'aalaha Badanaa La Isweydiyo

Xaafadda Debneys: dib-u-cusboonaysiinta cammaaradda  
Flemington

Dowladda Victoria waxay ballanqaaday kordhinta gurisiinta bulshada Victoria. Waxaan hagaajin doonaa xaaladaha guryaha ee daganeyaasha waxaana siinaynaa guryo badan dadka u baahan ayadoo loo marayo dib-u-cusboonaysiinta Flemington, oo ah mid ka mid ah cammaaradaha dhaadheer oo gabowga ah.

## Macluumaadka guud

### Waa maxay mashruucu?

Mashruucan wuxuu baddeli doonaa 22 dhismeyaasha wook-abka oo ku yaal Holland Court iyo Victoria Street wuxuuna samayn doonaa qorshe qaabeed ee dhammaan xaafadda debneys oo ay ku jiraan dhulka ay leedahay Mooney Valley Council. Waa qayb ka mid ah ballanqaadkii Dowladda Victoria si loo daboolo baahiyaha gurisiinta ee dadka Victoria, oo ay ku jiraan kuwa qaba baahiyaha degdegga ah.

### Immisa ayuu qaadani doonaa mashruuca dib-u-cusboonaysiinta?

Mashruucan waxaa loo qaybin doonaa dhowr sano. Waxaan xoogga-saaraynaa dhammaadka 2017ka inaan xalino arimaha qorshaynta degaanka iyo inaan kala hadalno daganeyaasha wax ku saabsan habka raridda. Ma filayno bilaabidda raridda ilaa dhammaadka 2017ka.

### Maxay tahay sababta loogu doortay goobtan mashruuca dib-u-cusboonaysiinta ballaaran?

Flemington waa meel weyn oo lagu ballaarin karo gurisiinta bulshada – waxay leedahay bulsho kala-duwan oo koraysa, waxaa u dhow oo ku yaal dugsiyo, tas-hiilaadka taageerada iyo goobaha madadaalada, hase ahaatee waxaa ka jira guryo gabow ah oo aan lahayn liftiyo aadna baahi ugu qaba in dib loo horumariyo.

Daganeyaashu waxay mudan yihiin gurisiinta bulshadeed taas oo daboolaysa baahiyahooda ahna heerarka casriga ah. Dhismeyaasha dhaadheer si isdabajoog ah ayaa loo dayactirayey, hadda waxaan wadnaa sidii loo csboonaysiin lahaa dhismeyaasha wook-abka si loo hagaajiyo xaaladaha nololeed oo ka jira cammaaradda iyo in si wacan loogala mid dhigo bulshooyinka ka ag-dhow.

### Waa maxay dhibaatooyinka ka jira dhismeyaasha wook-abka ee Flemington?

Dhismeyaasha wook-abka oo gabowga ah oo ku yaal Holland Court iyo Victoria Street way qarash badan tahay in la dayactiro waxay leedahay raaxo darro xiliyada cimilada kulul iyo kuwa qabow. Sidoo kalena, waxaa ku adag daganeyaal badan inay isticmaalaan jaranjarooyinka – maleh wax liftiyo ah. Si gacan looga gaysto baahiyaha koraya ee loo qabo gurisiinta bulshadeed, waxaa jira baahi degeg ah in dib loogu noqdo boodhka naqshadaynta kaas oo abuurto doona gurisiin iyo degaan cusub, isbaddel leh, casri ah oo raaxona leh. Arimaha bulshadeed kuwaas oo khuseeya daganeyaasha cammaaradda iyo bulsho weyntaba waxay kaloo u baahan yihiin baahi ah in wax laga qabto.

### Waa maxay faai'dooyinka dib-u-cusboonaysiintu?

Dib-u-cusboonaysiintu waxay kordhin doontaa keenidda gurisiinta bulshadeed ugu yaraan boqolkiiba 10 oo ku yaal qaybta degaanka ee gudaha Melbourne, oo u dhow gaadiidka, waxbarashada, madadaalada, shaqo-siinta iyo fursadaha hab-nololeedka. Mashruucu wuxuu kaloo keeni doonaa guryaha iibka gaarka ah oo bilicsan, deriskooda la haysta.

### **Sidee baa dib-u-cusboonaysiinta loo maalgelin doonaa?**

Ujeeddadyadu waa gurisiin bulshadeed cusub oo horumarsan oo ka jira cammaaradda oo laga maalgeliyo iibka guryaha gaarka ah oo looga jeedo in lagu kordhiyo cammaaradda ayagoo qayb ka ah mashruucan. Waxaan raadin doonaa dhowr siyaabood oo arintan lagu gaari karo si loo abuuro faai' dooyinka ugu waaweyn ee Victoria.

### **Yaa qaban doona gurisiinta gaarka ah?**

Waxaan hadda ku guda jirnaa habka Diiwaangelinta Awoodda (ROC) si loo aqoonsado dhiseyaasha waayo-aragga ah iyo iskaashadeyaalka gurisiinta bulshada ee cammaaradda Flemington iyo 7 cammaaradood oo kale. ROC waxay dhiirigelinaysaa naqshadaynta hal abuurka leh, qaababka maalgelinta iyo keenidda ugu yaraan boqolkiiba 10 gurisiin bulshadeed oo badan.

### **Maxay tahay sababta loogu darayaa gurisiinta gaarka ah?**

Cilmi-baarisayadu caalami ahaan iyo qaran ahaan waxay muujinayaan in isku-dhafka bulshooyinka oo isla-jira inay keento natiijooyinka waaweyn ee baabi'nta cuqdada gurisiinta bulshadeed, iyo yaraynta hab-dhaqanka lidka bulshadeed iyo kordhinta shaqo-siinta, waxbarashada iyo fursadaha kale. Waxaan ogsoonahay qaabkii cammaaridihii qadiimiga ee gurisiinta dadweynaha inaysan u keenin natiijooyinka habboon ee daganeyaasha iyo weliba degaanada bulshada ku wareegsan.

## **Waxka-baddelidda Mashruuca Qorshaynta La-soojeediyey**

### **Halkee baan ka arki karaa waxa la-soojeediyey?**

Tiro dokumantiyo iyo warbixino ah ayaa la diyaariyey, kuwaas qaarkood oo ah dokumantiyo taknikaal ah oo looga baahan yahay mashruuca noocaan ah. Dokumantiyadani waxaa laga heli karaa [www.planning.vic.gov.au/shrp](http://www.planning.vic.gov.au/shrp) ama laga eegi karaa dhowr xafiisyada City of Melbourne ama Moonee Valley City Council.

### **Waa maxay Qaab-dhismeedka Naqshaddu?**

Qaab-dhismeedka Naqshadda waxaa loo sameeyey ayadoo lala kaashanayo Xafiiska Victorian Government Architect, iyo Victorian Planning Authority iyo the Department of Environment, Land, Water and Planning. Waxay bixinaysaa xaqiijinta naqshadda ee wax-ka-baddellada mashruuca qorshaynta la-soojeediyey. Waxay muujinaysaa natiijooyinka la filayo si loo caawiyo bandhigidda sida goobta loo horumarin doono. Tani waxay caddaynaysaa dherarka dhismaha iyo caqabadihii laga soo-jeediyey Wax-ka-baddeladii Mashruuca Qorshaynta.

### **Dib-u-habayntu ma u'ekaan doontaa 3D Montages la-tilmaamay?**

3D montages la-tilmaamay waxaa loo diyaariyey inuu muujiyo siday isbaddelada qorshaynta la-soojeediyey u'ekaan doonto cammaaradda. Kuwan waxaa loo adeegsaday sidii aalad lagu muujinayo sida dhismeyaasha oo ku dhaqmaya isbaddelada qorshaynta la-soojeediyey ay uga caawin lahaayeen bulshada inay fahmaan siday mustaqbalka u e'kaan doonto.

### **Waa maxay Xaafadda Debneys – Qorshaha Dhismaha?**

Xaafadda Debneys – Qaab Dhismeedka waxaa loo soo-jeediyey inuu ahaado 'dokumanti tixraac' ah oo ku jira Mashruuca Qorshaynta. Marxaladda 1aad ee Qorshaha waxaa ku jira dib-u-habaynta cammaaradda Flemington waxaana ku jiri doona xarunta bulshada la-raray oo uu wado Councilku.

Marxaladda 2aad waxaa ku jiri doona Debneys Park iyo Hopetoun Early Years Centre, kuwaas oo labadaba ay leedahay City Council. Natiijooyinka ugu waaweyn oo laga filayo marxaladdan waa goobaha madadaalada, cayaaraha iyo tas-hiilaadka bulshada oo horumarsan oo loogu talagalay bulshada degaanka iyo isku-xirka horumarsan ee Flemington Bridge Railway Station.

### **Waa maxay Dokumantiyada Wax-ka-baddelka Mashruuca Qorshayntahat?**

Dokumantiyada Wax-ka-baddelka Mashruuca qorshaynta waa dokumanti taknikaal ah kuwaas oo looga baahan yahay markii lagu samaynay isbaddelada Mashruuca Qorshaynta. Qaar ka mid ah faqrada kuwa 'cusub' oo sidaan baan lagu muujiyey. Qaar ka mid ah isbaddelada waxay la xiriiraan faqrado hadda jira iyo kuwo dheeraad ah oo lagu muujiyey khadda midabka casaanka ah.

### **Intee dherar le'gyihiin dhismeyaasha cusub ee cammaaraddu?**

Dhismeyaal dhowr ah ayaa laga dhisi doonaa goobta dherarkuna waa kala duwaanaan doonaa. Dhismeyaasha ku yaal Victoria Street waxay noqon doonaan ilaa dherar 4 dabaq ah, ayadoo ilaa 20 dabaq loo qorsheeyey Racecourse Road frontage.

### **Immisa dhismeyaal ayaa laga dhisi doonaa cammaaradda?**

Qaabka-dhismeedka Naqshadda wuxuu qiyaasayaa in goobtaas ay qaadi doonto ilaa 1,100 guryo cusub ah. Tirada saxda ah ee dhismeyaasha waxaa laga go'aamin doonaa marka la gaaro maraxaladda bermika qorshaynta.

### **Sidee buu noqon doonaa isku-dhafka dhismeyaasha bulshadeed iyo kuwa gaarka ah?**

Arintaas waxaa la go'aamin doonaa ka dib marka habka Wax-ka-baddelka Mashruuca Qorshaynta la dhammaystiro. Barnaamijku wuxuu keeni doonaa korodhka dhismeyaasha gurisiinta bulshadeed ugu yaraan boqolkiiba toban.

### **Immisa qolal ayay guryaha cusub yeelan doonaan?**

Badiba guryaha gurisiinta bulshadeed ee cusub waxay noqon doonaan hal ama labo qol maaddaama ay kuwaani yihiin baahida ugu badan ee laga soo sheegay VIC Housing Register. Waxaan qoysaska u dhisi doonaa guryo waaweyn qaarkood.

Dib-u-eegiddii 2012 ee guryaheena oo uu sameeyey Hantidhowrka Guud wuxuu muujiyey isku-haboonaan la'aan ka jirta baaxadda dhismeyaasha iyo baahiyaha daganeyaasha wuxuuna muujiyey baahida loo qabo kordhinta tirada guryaha halka ama labada qol ah.

### **Sidee baa loo maarayn doonaa baabuurta iyo baarkinada ayadoo dad badan ku nool yihiin cammaaradda?**

Qiimayntii Baabuurta iyo Gaadiidka (Beveridge Williams, 29 April 2017) ayaa la diyaariyey si loo taageero isbaddelada qorshaynta la-soojeediyey.

Haddii loo baahdo, qiimaynada Baabuurta oo dheeraad ah ayaa la samayn doonaa inta lagu jiro habka bermitka qorshaynta wuxuuna tixgelin doonaa wixii tallaabooyin ah oo looga bahan yahay si loo maareeyo saamaynta laga fili karo oo ka dhalanaysa dib-u-cusboonaysiinta.

### **Maxaa iska-baddeli doona deriskayga degaanka?**

Aragtida Mashruuca Dibi-u-cusboonaynta Flemington waa in la abuur bulsho leh isku-dhaf guryo iyo daganeyaal si loo abuur fursadaha shaqo-siinta, keenidda faai'dooyinka bulshadeed, iyo dardargelinta isdhexgalka daganeyaasha iyo cammaaradaha derisyada degaanka.

Dhismeyaasha wook-abka ee ku yaal Holland Court iyo Victoria Street waa la dumin doonaa waxaana lagu baddeli doonaa dhismeyaal casri ah oo leh liftiyo iyo tas-hiilaad kala duwan si loo daboolo baahiyaha daganeyaasha.

### **Dhismeyaasha dhaadheer oo hadda jira mala dayn doonaa?**

Dhismeyaasha dhaadheer oo hadda ka jira cammaaradda dhisme ahaan way fiican yihiin si joogto ahna waa loo dayactiraa. Dhammaan dayactiridda guryaha dhaadheer ee Flemington waxaa la dhammaystiri doonaa 2017ka.

### **Waa maxay muuqaalka guryaha cusub?**

Guryaha la Baddeley ee cammaaradda waxay yeelan doonaan liftiyo waxaana si fudud u heli kara dadka da'da ah, qoysaska, dadka qaba arimaha dhaqdhaqaaqa iyo dadka qaba iinta.

Guryaha waxaa loo dhisi doonaa Heerarka Naqshadda Qolalka Wacan waxayna yeelan doonaan qiyaasidda tamarta oo toddoba xidigood ah taas oo ka dhigaysa qabow xiliga samarka iyo kuwa diiran xiliga qabowga iyo kuwo raqiis ku ah xaga kulaylka iyo qabowga. Guryahu waxay u baahan doonaan dayactirid aad u yar.

Guryaha waxaa ku jiraya loondari gudeed iyo kaydin korortay.

Qorsheyaashayadu waxay kaloo eegi doonaan qaar ka mid taxadiyaadka u gaarka ah Flemington – tusaale, muuqaalka horumarsan iyo dukaamada cusub iyo goobaha bulshada si loo abuuro fursadaha bulshadeed iyo kuwa dhaqaale oo badan oo ay helayaan dhammaan daganeyaasha ku nool derisyada.

### **Sidee baan ula wadaagi karaa fikradahayga ku saabsan Wax-ka-baddelidda Mashruuca Qorshaynta La-soojeediyey?**

Ka eeg [www.planning.vic.gov.au/shrp](http://www.planning.vic.gov.au/shrp) si aad u eegto dokumantiska, samee wax-soo-gudbintaada ama wixii macluumaad dheeraad ah. Wax-soo-gudbinta waa in laga sameeyaa online-ka 5pm Jumcaha 21ka Luuliyo 2017.

## **Tallaabooyinka xiga iyo macluumaad dheeraad ah**

### **Hadda maxaa dhacaya?**

- Juun 2017 –Wax-soo-gudbinta ku saabsan isbaddellada mashruuca qorshaynta la-soojeediyey waa la aqbali doonaa ilaa **5pm Jumcaha 21 Luuliyo 2017 ayadoo la marayo [www.planning.vic.gov.au/shrp](http://www.planning.vic.gov.au/shrp).**

### **Sidee baa la ii-wargelinayaa ama u raadin karaa faahfaahinta ku saabsan mashruuca?**

- Iska-diiwaangeli arimaha mashruuca [Flemington.renewal@dhhs.vic.gov.au](mailto:Flemington.renewal@dhhs.vic.gov.au)
- Ka eeg <http://www.housing.vic.gov.au/flemington-renewal-program>
- Wac 13 11 72
- Ama daganeyaasha cammaaradda waxay la hadli karaan Xafiiska Guryaha ee degaanka oo ku yaal 12 Churchill Avenue, Ascot Vale ama wac 9371 6200.

### **Macluumaadka xiriirka**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan goobta iyo kala doorashada isbaddelada qorshaynta la-soojeediyey, fadlan kala xiriir Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Insaanka taleefanka (03) 9096 5281 ama email u dir [flemington.renewal@dhhs.vic.gov.au](mailto:flemington.renewal@dhhs.vic.gov.au).

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan habka Guddiga La-talinta, fadlan kala xiriir Planning Panels Victoria taleefanka (03) 8392 5123 ama email u dir [planning.panels@delwp.vic.gov.au](mailto:planning.panels@delwp.vic.gov.au).

Dhammaan su'aalaha kale waa in lagu hagaajiyaa Wasaaradda Department of Environment, Land, Water and Planning taleefanka (03) 8683 0950 ama email u dir [sh.renewal@delwp.vic.gov.au](mailto:sh.renewal@delwp.vic.gov.au).

Juun 2017